



SUMMAD: WCAD/XW/3615/10/2026

Tr: 19/10/2026

UJEEDDO: DIGREETADA “DHAQAN-GELINTA HABRAACA DIIWAANGELINTA MA'DUUNKA IYO FULINTA GUURKA”

WASIIRKA WASAARADDA CADDAAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA EE XUKUUMADDA JFS;

Markuu arkay Qodobka 122^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Qodobka 51^{aad} ee Xeer-nidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda, Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 174, ee soo baxay 15 Febraayo 2025;

Markuu tixgeliyey Baahida loo qabo nidaaminta habraaca guurinta ay fuliyaan Ma'duunnada, diiwaangelintooda, rukhsad-siintooda, kormeerkooda iyo habraaca xaqiijinta guurka

Marka uu garwaaqsaday Muhiimadda ay leedahay in la mideeyo habraaca guurinta iyo Foomka Guurka ee Mideysan, lana xaqiijiyo in guurinta loo fuliyo si waafaqsan Shareecada Islaamka iyo xeerarka dalka;

WUXUU XEERIYEEY:

**Qodobka 1^{aad}
Dhaqan-gelinta Habraaca**

Waxaa la dhaqan-geliyey “Habraaca Diiwaangelinta Ma'duunka Iyo Fulinta Guurka” ee ku lifaaqan Digreetadan.

**Qodobka 2^{aad}
Wargelin**

Digreetadan iyo Habraaca ku lifaaqan waxaa la gaarsiinayaa hay'adaha Dowladda iyo dhammaan dhinacyada ay khasayso si ay ugu dhaqmaan una fuliyaan waajibaadka kaga aaddan.

**Qodobka 3^{aad}
Dhaqangal**

Digreetadani waxay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee Xukuumadda JFS.



Mudane Hassan Macallin Mahmoud Sheekh

WASIIRKA WASAARADDA CADDAAALADDA IYO ARR. DASTUURKA



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA CADDAAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA

HABRAACA DIIWAANGELINTA
MA'DUUNKA IYO FULINTA GUURKA

Muqdisho – 2026



TUSMO

CUTUBKA 1AAD QODOBBADA GUUD	3
Qodobka 1 ^{aad} Magaca Habraaca	3
Qodobka 2 ^{aad} Qeexitaanno	3
Qodobka 3 ^{aad} Saldhigga Sharci iyo Ujeeddada Habraaca	4
CUTUBKA 2AAD DIIWAANGELINTA IYO RUKHSAD-SIINTA MA'DUUNKA.....	4
Qodobka 4 ^{aad} Shuruudaha Ma'duunka	4
Qodobka 5 ^{aad} Baahida iyo Baahinta Ma'duunnimada.....	5
Qodobka 6 ^{aad} Codsiga iyo Dokumentiyada Ma'duunnimada	5
Qodobka 7aad Hubinta iyo Xulashada Codsadayaasha	6
Qodobka 8aad Rukhsadda Ma'duunnimada	6
Qodobka 9 ^{aad} Diiwaanka Guud ee Ma'duunnada ee JFS.....	7
CUTUBKA 3AAD HABRAACA FULINTA IYO DIIWAANGELINTA GUURKA.....	7
Qodobka 10 ^{aad} Waajibaadka Ma'duunka ee Fulinta Guurka	7
Qodobka 11 ^{aad} Foomka Guurka ee Mideysan.....	8
Qodobka 12 ^{aad} Gudbinta Foomka Guurka	9
Qodobka 13 ^{aad} Diiwaangelinta iyo Sugitaanka Guurka	9
CUTUBKA 4AAD KORMEERKA IYO ANSHAX-MARINTA MA'DUUNKA	10
Qodobka 14 ^{aad} Warbixinta Ma'duunka	10
Qodobka 15 ^{aad} Kormeerka Ma'duunka	10
Qodobka 16 ^{aad} Xadgudubyada Ma'duunka	10
Qodobka 17 ^{aad} Tallaabooyinka Anshax-marinta	11
Qodobka 18 ^{aad} Cabashada Go'aanka Anshax-marinta	11
CUTUBKA 5AAD QODOBBO GUNAANAD AH.....	12
Qodobka 19 ^{aad} Xushmadda Ma'duunka	12
Qodobka 20 ^{aad} Guurka uu Fuliyo Garsooruhu	12
Qodobka 21 ^{aad} Ilaalinta Xogta iyo Sirta	12
Qodobka 22 ^{aad} Awoodda Soo-saarista Tilmaamaha Fulinta	12
Qodobka 23 ^{aad} Dhaqan-galka.....	13



CUTUBKA 1AAD QODOBBADA GUUD

Qodobka 1^{aad}

Magaca Habraaca

Habraacan waxaa lagu magacaabaa “Habraaca Diiwaangelinta Ma’duunka iyo Fulinta Guurka”

Qodobka 2^{aad}

Qeexitaanno

Habraacan dhexdiisa, haddii aan macnaha guud si kale u tilmaamayn, ereyadan soo socda waxaa loola jeedaa macnaha ku hor qoran:

1. **“Wasaaradda”**: Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Xukuumadda JFS ee u xilsaaran Arrimaha Caddaaladda iyo Darstuurka.
2. **“Wasiirka”**: Waxaa loola jeedaa Wasiirka Xukuumadda JFS ee u xilsaaran Arrimaha Cadaaladda.
3. **“Ma’duun”**: Waxaa loola jeedaa qof ay Wasaaraddu diiwaangelisay oo siisay rukhsad uu ku fuliyo guurinta, isaga oo adeegsanaya Foomka Guurka ee Mideysan si waafaqsan Habraacan.
4. **“Rukhsadda Ma’duunka”**: Waxaa loola jeedaa oggolaanshaha rasmiga ah ee ay Wasaaraddu siiso qofka buuxiya shuruudaha Ma’duunnimada, kaas oo u oggolaanaya inuu fuliyo hawlaha Ma’duunnimada.
5. **“Diiwaanka Ma’duunnada”**: Waxaa loola jeedaa diiwaanka rasmiga ah ee ay Wasaaraddu ku diiwaangeliso xogta Ma’duunnada, rukhsadahooda iyo xaaladda rukhsadahooda.
6. **“Foomka Guurka ee Mideysan”**: Waxaa loola jeedaa foomka rasmiga ah ee ay Wasaaraddu soo saarto, kaas oo Ma’duunku u adeegsado fulinta guurinta iyo diiwaangelinta xogta guurka.
7. **“Maxkamadda Awoodda u Leh”**: Waxaa loola jeedaa maxkamadda awoodda u leh arrimaha qoyska ee degmada uu guurku ka dhacay.
8. **“Sugitaanka Guurka”**: Waxaa loola jeedaa dokumentiga ay Maxkamadda Awoodda u leh soo saarto kaddib marka ay xaqiijiso oo diiwaangeliso guurka si waafaqsan Habraacan.
9. **“Dhacdada Guurka”**: Waxaa loola jeedaa guurka la fuliyay ee loo gudbiyay hay’adda u xilsaaran diiwaangelinta xaaladaha madaniga ah si rasmi ahaan loo diiwaangeliyo.

Qodobka 3^{aad}

Saldhigga Sharci iyo Ujeeddada Habraaca

1. Habraacaan waxaa saldhig u ah Qodobka 122^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Qodobka 5^{aad} ee Xeer Lr. 23 ee soo baxay Janaayo 1975 Xeerka Qoyska, Qodobka 30^{aad} ee Sharci Lr.1 ee soo baxay 05 April 2026 Sharciga Dad-dhigista iyo Tirakoobka Xaaladaha Madaniga iyo Qodobka 51^{aad} ee Xeer-nidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda, Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 174, ee soo baxay 15 Febraayo 2025;
2. Habraacan waa nidaaminta diiwaangelinta, tababbarka, rukhsad-siinta iyo kormeerka Ma'duunnada, iyo habraaca fulinta, xaqiijinta iyo diiwaangelinta guurka.
3. Habraacan wuxuu khuseeyaa Ma'duunnada iyo hay'adaha dawladda ee leh awood ama waajibaad la xiriiira diiwaangelinta iyo rukhsad-siinta Ma'duunnada, fulinta guurinta, xaqiijinta guurka iyo diiwaangelinta Dhacdada Guurka.

CUTUBKA 2AAD

DIIWAANGELINTA IYO RUKHSAD-SIINTA MA'DUUNKA

Qodobka 4^{aad}

Shuruudaha Ma'duunka

1. Qofka codsanaya Ma'duunnimada waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:
 - a) Waa inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed oo Muslim ah;
 - b) Waa inuu leeyahay awood/ahliyaad sharci oo buuxda;
 - c) Waa in da'diisu aysan ka yareyn shan iyo labaatan (25) sano;
 - d) Waa inuu haystaa shahaado jaamacadeed oo ku saabsan Culuumta Sharciga ama haystaa aqoon u dhiganta ee la xiriiirta culuumta Sharciga;
 - e) Waa inuu leeyahay dhaqan iyo sumcad wanaagsan uuna haysto waraaq Asluub wanaag ah (Taskiyah);
 - f) Waa inaan lagu xukumin dembi la xiriiira ammaanada, musuqmaasuqa ama been-abuurka, ama dembi kasta oo ciqaabtiisu ka badan tahay shan (5) sano oo xarig ah; iyo
 - g) Waa inuu caafimaad ahaan iyo maskax ahaanba awood u leeyahay gudashada hawlaha Ma'duunnimada.
2. Wasaaraddu waxay xaqiijinaysaa u hoggaansanaanta shuruudaha ku xusan faqradda 1^{aad} ee Qodobkan iyadoo hubinaysa dokumentiyada iyo caddeymaha rasmiga ah ee codsadaha.



Qodobka 5^{aad}

Baahida iyo Baahinta Ma'duunnimada

1. Wasaaraddu waxay qiimeyn ku sameynaysaa baahida Ma'duunnada ee degmooyinka, iyadoo tixgelinaysa tirada dadka, baaxadda deegaanka, tirada Ma'duunnada ka hawlgala degmada iyo baahida adeegga guurka.
2. Marka Wasaaraddu hesho codsi dalbasho Ma'duunimo.
3. Baahinta ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan waa in lagu caddeeyaa:
 - a) tirada Ma'duunnada loo baahan yahay;
 - b) shuruudaha laga rabo codsadaha;
 - c) dokumentiyada laga rabo codsadaha;
 - d) habka loo gudbinayo codsiga; iyo
 - e) muddada kama dambaysta ah ee gudbinta codsiga.
4. Codsiga Ma'duunnimada waxaa la gudbin karaa oo keliya marka Wasaaraddu baahiso fursad Ma'duunnimo si waafaqsan Qodobkan.

Qodobka 6^{aad}

Codsiga iyo Dokumentiyada Ma'duunnimada

1. Qofka doonaya inuu noqdo Ma'duun wuxuu codsigiisa u gudbinayaa Wasaaradda muddada iyo habka lagu cayimay baahinta.
2. Codsadaha waa inuu codsigiisa ku soo lifaaqaa dokumentiyadan:
 - a) Nuqul ka mid ah Kaarka Aqoonsiga Qaranka;
 - b) Nuqul ka mid ah shahaadada jaamacadeed oo sharciga ayna tasdiiqisay Wasaaradda Xukuumadda JFS ee u xilsaaran tacliinta sare ama caddeynta aqoon u dhiganta;
 - c) Shahaada dembi-la'aanta ee ay soo saartay hay'adda awoodda u leh;
 - d) Shahaado caafimaad oo caddeynaysa inuu awood u leeyahay gudashada hawlaha Ma'duunnimada oo ay soo saartay xarun caafimaad oo la aqoonsanyahay;
 - e) Nuqul ka mid ah Taariikh-nololeedkiisa (CV);
 - f) Laba sawir oo cabbirka Baasaboorka ah, lana qaaday muddo aan ka badnayn lix (6) bilood gudahood; iyo
 - g) Dokumentiyada kale oo ay Wasaaraddu u aragto lagama maarmaan xaqiijinta shuruudaha Ma'duunnimada.

3. Wasaaraddu waxay hubinaysaa dhammaystirnaanta iyo sax ahaanshaha dokumentiyada la soo gudbiyay ka hor inta aan codsadaha loo gudbin marxaladda xulashada.

Qodobka 7aad

Hubinta iyo Xulashada Codsadayaasha

1. Wasaaraddu waxay hubinaysaa in codsaduhu buuxiyay shuruudaha ku xusan Qodobka 4^{aad}, isla markaana uu soo gudbiyay dokumentiyada ku xusan Qodobka 6^{ad} ee Habraacan.
2. Codsadayaasha buuxiya shuruudaha waxay Wasaaraddu u gudbinaysaa qiimeyn lagu hubinayo aqoontooda iyo ku habboonaanshahooda gudashada hawlaha Ma'duunnimada.
3. Marka tirada codsadayaasha buuxiyay shuruudaha ay ka badan tahay tirada Ma'duunnada loo baahan yahay, Wasaaraddu waxay xulashada ku salaynaysaa natiijada qiimeynta, aqoonta iyo khibradda codsadayaasha.
4. Wasaaraddu waxay soo saaraysaa liiska codsadayaasha ku guulaystay xulashada, kuwaas oo loo gudbinayo tababbarka Ma'duunnada.

Qodobka 8aad

Rukhsadda Ma'duunnimada

1. Wasaaraddu waxay Rukhsadda Ma'duunnimada siinaysaa codsadaha lagu xulay si waafaqsan Qodobka 7^{aad} ee Habraacan.
2. Rukhsadda Ma'duunnimada waxaa saxiixaya Wasiirka, waxayna ansax tahay muddo laba (2) sano ah oo ka bilaabmayso taariikhda la bixiyay.
3. Rukhsadda Ma'duunnimada waa inay ku caddaadaan ugu yaraan:
 - a) magaca Ma'duunka;
 - b) lambarka gaarka ah ee rukhsadda;
 - c) taariikhda bixinta rukhsadda; iyo
 - d) taariikhda dhammaadka rukhsadda.
4. Ma'duunku waa inuu codsiga cusboonaysiinta rukhsadda u gudbiyaa Wasaaradda ugu yaraan soddon (30) maalmood ka hor taariikhda dhammaadka rukhsadda.
5. Wasaaraddu waxay cusboonaysiinaysaa rukhsadda marka ay xaqiijiso in Ma'duunku weli buuxinayo shuruudaha ku xusan Habraacan, isla markaana aysan jirin sabab sharci ah oo hortaagan cusboonaysiinteeda.



6. Khidmadaha bixinta iyo cusboonaysiinta Rukhsadda Ma'duunnimada waxaa go'aaminaya Wasiirka.
7. Ma'duunku wuxuu hawlaha Ma'duunnimada ka fulinayaa Degmada/Gobolka lagu cayimay rukhsaddiisa, haddii aanu Wasaaradda ka helin oggolaansho kale.
8. Qofna ma gudan karo hawlaha Ma'duunnimada isaga oo aan haysan Rukhsad Ma'duunnimo oo ansax ah.

Qodobka 9^{aad}

Diiwaanka Guud ee Ma'duunnada ee JFS

1. Wasaaraddu waxay samaynaysaa, maamulaysaa, isla markaana joogto u cusboonaysiinaysaa Diiwaanka Guud ee Ma'duunnada ee JFS.
2. Wasaaradaha u xilsaaran arrimaha cadaaladda ee Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir waxay Wasaaradda la wadaagayaan xogta Ma'duunnada ay rukhsadda siiyeen, si loogu daro Diiwaanka Guud ee Ma'duunnada ee JFS.
3. Diiwaanka Guud ee Ma'duunnada waa inuu ugu yaraan muujiyaa:
 - a) magaca oo buuxa ee Ma'duunka;
 - b) lambarka gaarka ah ee rukhsadda;
 - c) taariikhda bixinta iyo dhammaadka rukhsadda;
 - d) taariikhda cusboonaysiinta rukhsadda, haddii ay jirto; iyo
 - e) xaaladda rukhsadda, oo muujinaysa inay ansax tahay, hakad ku jirto ama lagala noqday.
4. Wasaaraddu waxay Diiwaanka Guud ee Ma'duunnada ka dhigaysaa mid baahsan oo ay dadweynuhu heli karaan, iyadoo la soo bandhigayo xogta Ma'duunka intii suurtagal ah.
5. Soo bandhigista xogta ku jirta Diiwaanka Guud ee Ma'duunnada waa in loo sameeyaa si waafaqsan shuruucda ilaalinta xogta shakhsiga ah.

CUTUBKA 3AAD

HABRAACA FULINTA IYO DIIWAANGELINTA GUURKA

Qodobka 10^{aad}

Waajibaadka Ma'duunka ee Fulinta Guurka

1. Ma'duunku, marka uu fulinayo guurinta, waa inuu:
 - a) xaqiijiyaa aqoonsiga labada qof ee guurka gelaya, isaga oo adeegsanaya dokumenti aqoonsi oo rasmi ah;



- b) hubiyaa in labada qof ee guurka gelaya ay buuxiyeen shuruudaha iyo tiirarka guurka;
 - c) hubiyaa oggolaanshaha labada qof ee guurka gelaya;
 - d) hubiyaa joogitaanka iyo aqoonsiga waliga iyo markhaatiyaasha;
 - e) hubiyaa warbixinta caafimaadka ee labada qof ee guurka gelaya, oo ay soo saartay xarun caafimaad oo la aqoonsan yahay;
 - f) hubiyaa inaysan jirin arrin diidaysa guntanka guurka si waafaqsan Shareecada Islaamka iyo xeerarka dalka;
 - g) helo oggolaanshaha Maxkamadda Awoodda u leh marka guurku yahay mid u baahan oggolaanshaha Maxkamadda;
 - h) U fuliyo siiqada guurka si waafaqsan Mad-habka Shaaficiga;
 - i) Si sax ah oo dhammaystiran u buuxiyaa Foomka Guurka ee Mideysan, isla markaana xaqiijiyaa saxiixyada dadka ay khusayso; iyo
 - j) Foomka Guurka ee Mideysan iyo dokumentiyada la xiriira u gudbiyaa Maxkamadda Awoodda u leh, si waafaqsan Habraacan.
2. Ma'duunku ma fulin karo guurin haddii aan la buuxin shuruudaha guurka, ay jirto arrin diidaysa guntanka guurka, ama aan la helin oggolaanshaha Maxkamadda awoodda u leh marka sharcigu waajibinayo.

Qodobka 11^{aad}

Foomka Guurka ee Mideysan

1. Wasaaraddu waxay soo saaraysaa Foomka Guurka ee Mideysan ee Ma'duunku u adeegsanayo fulinta iyo diiwaangelinta xogta guurka.
2. Foomka Guurka ee Mideysan waa inuu ugu yaraan muujiyaa:
 - a) xogta aqoonsiga labada qof ee guurka gelaya;
 - b) xogta waliga iyo markhaatiyaasha;
 - c) goobta iyo taariikhda guurka;
 - d) xogta meherka;
 - e) shuruudaha ay dhinacyadu ku heshiiyeen, haddii ay jiraan;
 - f) xogta Ma'duunka fuliyay guurinta iyo lambarka rukhsaddiisa;
 - g) saxiixyada labada qof, waliga, markhaatiyaasha iyo Ma'duunka; iyo
 - h) xog kasta oo kale oo lagama maarmaan u ah diiwaangelinta guurka.
3. Ma'duunku waa inuu Foomka Guurka ee Mideysan u buuxiyaa si sax ah oo dhammaystiran marka uu fulinayo guurinta.

4. Lama oggola in Ma'duunku isticmaalo foom aan ahayn Foomka Guurka ee Mideysan ee ay Wasaaraddu soo saartay.

Qodobka 12^{aad}

Gudbinta Foomka Guurka

1. Ma'duunku, marka uu fuliyo guurinta oo uu dhammaystiro Foomka Guurka ee Mideysan, waa inuu foomka iyo dokumentiyada la xiriira u gudbiyaa maxkamadda awoodda u leh ee degmada uu guurku ka dhacay iyo Diin-hayaya u xil-saaran diiwaangelinta Xaaladaha Madaniga ah ee Degmadaas.
2. Foomka Guurka ee Mideysan waa in lala gudbiyaa:
 - a) nuqullada dokumentiyada aqoonsiga labada qof ee is guursaday;
 - b) nuqullada dokumentiyada aqoonsiga ee Waliga iyo Marqaatiyaasha;
 - c) warbixinta caafimaadka ee labada qof;
 - d) oggolaanshaha maxkamadda awoodda u leh, haddii guurku ahaa mid u baahana oggolaansho Maxkamadeed; iyo
 - e) dokumenti kasta oo kale oo la xiriira guurka, haddii uu jiro.
3. Ma'duunku wuxuu mas'uul ka yahay saxnaanta iyo dhammaystirnaanta Foomka Guurka ee Mideysan iyo dokumentiyada uu u gudbinayo.

Qodobka 13^{aad}

Diiwaangelinta iyo Sugitaanka Guurka

1. Maxkamadda awoodda u leh, marka ay hesho Foomka Guurka ee Mideysan iyo dokumentiyada la socda, waxay hubinaysaa dhammaystirnaantooda iyo waafaqsanaantooda Shareecada Islaamka, xeerarka dalka iyo Habraacan.
2. Marka Maxkamaddu xaqiijiso in shuruudaha guurka la buuxiyay, waxay diiwaangelinaysaa guurka, waxayna soo saaraysaa Sugitaanka Guurka.
3. Mid kasta oo ka mid ah lammaanaha waxaa la siinayaa nuqul ka mid ah Sugitaanka Guurka.
4. Haddii Foomka Guurka ee Mideysan ama dokumentiyada la socda ay ka maqan yihiin xog ama u baahan yihiin sixid, Maxkamaddu waxay ku celinaysaa Ma'duunka si loo dhammaystiro ama loo saxo.

CUTUBKA 4AAD
KORMEERKA IYO ANSHAX-MARINTA MA'DUUNKA

Qodobka 14^{aad}

Warbixinta Ma'duunka

1. Ma'duunku waa inuu warbixin joogto ah u gudbiyaa waaxda u xilsaaran diiwaangelinta iyo kormeerka Ma'duunnada ee Wasaaradda.
2. Warbixinta Ma'duunku waa inay ugu yaraan koobtaa:
 - a) tirada guurinta ee uu fuliyay muddada warbixintu khusayso;
 - b) taariikhda iyo goobta guur kasta lagu fuliyay;
 - c) lambarka Foomka Guurka ee Mideysan ee guur kasta;
 - d) tirada guurka loo gudbiyay maxkamadda awoodda u leh;
 - e) tirada guurka ay Maxkamaddu diiwaangelisay oo ay ka soo saartay Sugitaanka Guurka;
 - f) tirada guurka loo gudbiyay hay'adda u xilsaaran diiwaangelinta xaaladaha madaniga ah; iyo
 - g) xog kasta oo kale oo ay Wasaaraddu uga baahan tahay kormeerka hawlaha Ma'duunka.
3. Wasaaraddu waxay go'aaminaysaa muddada, foomka iyo habka loo gudbinayo warbixinta ku xusan Qodobkan.

Qodobka 15^{aad}

Kormeerka Ma'duunka

1. Wasaaraddu waxay kormeer ku samaynaysaa gudashada hawlaha Ma'duunka si loo xaqiijiyo u hoggaansanaanta Habraacan.
2. Ma'duunku waa inuu Wasaaradda u fududeeyaa kormeerka, una soo bandhigaa diiwaannada, foomamka iyo dokumentiyada la xiriira hawlaha Ma'duunnimada marka laga dalbado.

Qodobka 16^{aad}

Xadgudubyada Ma'duunka

1. Ma'duunku wuxuu ku kacayaa xadgudub haddii uu:
 - a) fuliyo guur isaga oo aan haysan Rukhsad Ma'duunnimo oo ansax ah;
 - b) fuliyo guur isaga oo aan hubin shuruudaha guurka ee ku xusan Habraacan;
 - c) fuliyo guur isaga oo aan helin oggolaanshaha maxkamadda awoodda u leh, marka sharcigu waajibinayo oggolaanshahaas;



- d) adeegsado foom aan ahayn Foomka Guurka ee Mideysan ee ay Wasaaraddu soo saartay;
 - e) si ula kac ah u qoro, u beddelo ama u gudbiyo xog aan sax ahayn oo la xiriirta guurka;
 - f) gudbin waayo Foomka Guurka ee Mideysan iyo dokumentiyada la xiriira maxkamadda awoodda u leh;
 - g) gudbin waayo xogta Sugitaanka Guurka;
 - h) gudbin waayo warbixinnada looga baahan yahay si waafaqsan Habraacan;
 - i) diido ama carqaladeeyo kormeerka Wasaaradda; ama
 - j) ku xadgudbo waajibaad kale oo ku xusan Habraacan.
2. Xadgudubyada ku xusan Qodobkan waxaa Ma'duunka looga qaadi karaa tallaabo anshax-marin si waafaqsan Habraacan.

Qodobka 17^{aad}

Tallaabooyinka Anshax-marinta

1. Ma'duunka ku kaca xadgudub ku xusan Qodobka 18^{aad} ee Habraacan waxaa, iyadoo la tixgelinayo nooca iyo culayska xadgudubka, laga qaadi karaa:
 - a) digniin qoraal ah;
 - b) hakinta Rukhsadda Ma'duunnimada muddo cayiman; ama
 - c) kala noqoshada Rukhsadda Ma'duunnimada.
2. Tallaabooyinka anshax-marinta waxaa go'aan ka gaaraya Wasiirka, kaddib marka Ma'duunka lagu wargeliyo xadgudubka loo haysto lana siiyo fursad uu kaga jawaabo.
3. Go'aanka anshax-marintu waa inuu noqdaa mid qoraal ah oo sababaysan, waxaana lagu wargelinayaa Ma'duunka ay khusayso.
4. Hakinta ama kala noqoshada rukhsadda waa in lagu diiwaangeliyo Diiwaanka Guud ee Ma'duunnada ee JFS.

Qodobka 18^{aad}

Cabashada Go'aanka Anshax-marinta

1. Ma'duunka aan ku qanacsanayn go'aanka anshax-marinta ee Wasaaradda wuxuu go'aankaas uga caban karaa Maxkamadda awooda u leh, si waafaqsam sharciyada dalka.
2. Cabashada loo gudbiyo Maxkamadda ma hakineyso fulinta go'aanka anshax-marinta, haddii aysan Maxkamaddu si kale u amrin.

CUTUBKA 5AAD
QODOBBO GUNAANAD AH

Qodobka 19^{aad}

Xushmadda Ma'duunka

1. Ma'duunka iyo dhinacyada ay khusayso waxay ku heshiinayaan khidmadda adeegga guurinta.
2. Wasiirku wuxuu Digreeto ku go'aaminayaa xadka ugu yar ee khidmadda adeegga guurinta ee Ma'duunku qaadan karo.
3. Khidmadda ay ku heshiiyaan Ma'duunka iyo dhinacyada ay khusayso kama yaraan karto xadka ugu yar.

Qodobka 20^{aad}

Guurka uu Fuliyo Garsooruhu

1. Guurka uu fuliyo garsooruhu waxaa loo raacayaa habraacyada uu soo saaro Golaha Sare ee Garsoorka.
2. Haddii aysan jirin habraacyo uu soo saaray Golaha Sare ee Garsoorka oo nidaaminaya guurka uu fuliyo garsooruhu, waxaa la raacayaa qodobbada Habraacan intii la dabaqi karo.

Qodobka 21^{aad}

Ilaalinta Xogta iyo Sirta

1. Wasaaradda, Ma'duunka iyo cid kasta oo fulinaysa waajibaad ku xusan Habraacan waa inay ilaaliyaan xogta shakhsiga ah iyo dokumentiyada la xiriira guurka ee ay helaan iyagoo gudanaya waajibaadkooda.
2. Xogta iyo dokumentiyada ku xusan faqradda 1^{aad} ee Qodobkan looma adeegsan karo ujeedo aan la xiriirin fulinta waajibaadka ku xusan Habraacan, haddii aanu sharcigu si kale u oggolaan ama waajibin.
3. Xogta shakhsiga ah waxaa lala wadaagi karaa oo keliya hay'adaha awoodda sharci u leh, iyadoo la raacayo xeerarka dalka ee khuseeya ilaalinta xogta.

Qodobka 22^{aad}

Awoodda Soo-saarista Tilmaamaha Fulinta

1. Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda wuxuu soo saari karaa tilmaamaha lagama maarmaanka u ah hirgelinta Habraacan.
2. Tilmaamaha lagu soo saaro faqradda 1aad ee Qodobkan waa inay waafaqsan yihiin Habraacan iyo xeerarka dalka.

Qodobka 23^{aad}

Dhaqan-galka

Habraacani wuxuu dhaqan-gelayaa laga billaabo taariikhda uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee Xukuumadda JFS.